

Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda Waaweyn

SM

Su'aalaha Soo Noqnoqda


Sida loo isticmaalo kaarkaaga dheefta ee SFMNP

1. U soo qaado kaarkaaga dheefta SFMNP suuqa beeraleyda ee barnaamijka ka qaybgalaya.
2. Dooro cuntooyinka u qalma ee qofka beeraleyda ah ee ka qaybgalaya ka-dibna kaarkaaga u dhiib.
3. Qofka beeraleyda ah ayaa ku iskaan-gareyn doonno koodhka QR ee kaarkaaga telefoonkooda gacanta ama aalad.
4. Waxaad dib-u-eegi doontaa qiimaha waxaadna gelin doontaa lambarkaaga aqoonsiga shakhsiga (sidoo kale loo yaqaano PIN*) aaladda qofka beeraleyda ah si aad u oggolaato iibsashada.
5. Qofka beeraleyda ah wuxuu xaqiijin doonaa iibsashadaada waxaadna heli doontaa dalag maxalli ah, oo markaasi la soo gurey ama malab!
6. Si aad u eegto haraagaaga dheefta SFMNP, wac lambarkan 1-844-359-3104 (oo ku yaalla xagga dambe ee kaarkaaga) ka-dibna raac waxyaabaha loo baahan yahay.



*PIN-kaaga caadiga ah waa iskujirka 4-lambar oo ka kooban bisha iyo sannadka taariikhdaada dhalashada (BBSS). Tusaale ahaan, haddii taariikhdaada dhalashada ay tahay 4-ta bisha Luulyo, 1926, PIN-kaaga wuxuu noqon doonaa 0726. Fadlan u isticmaal PIN-kaaga taariikhda dhalashada 4-lambar ee gaarka ah macaamulaad kasta. Waxaad beddeli kartaa PIN-kaaga adiga oo wacaya lambarka telefoonka "haraaga dheefta" ee ku yaalla xagga dambe ee kaarkaaga.

Su'aalaha Soo Noqnoqda

<p>Sideen ku helaan dheefaha SFMNP?</p>	<p>Ka-qaybgalayaasha ayaa codsanaya in ay helaan dheefaha SFMNP iyaga oo ka helaya hay'adaha degaankooda ee gaboobidda ama bixiyeyaasha nafaqada degaanka. Hannaanka codsiga ee ka-qaybgalayaasha wuxuu la mid yahay hannaanadii sannadahii la soo dhaafey waxaana loo baahan yahay in la buuxiyo codsi xaqiijinaya in qofka weyni uu buuxiyo shuruudaha xaq-u-yeelashada.</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Da'da: 60 sano ama ka weyn, ama 55+ haddi aad tahay Mareykan Asal ah/Dhalad Alaskan Asal ah; 2. Dakhlaga: ka yar 185% ee Heerka Saboolnimada Federaalka; 3. Degenaanshaha: waa in uu yahay qof deggan Gobolka Washington.
<p>Maxaan ku iibsan karaa kaarkeyga dheefaha?</p>	<p>Geedaha cuntada lagu darsado, malab, khudaar, iyo miro markaasi la soo gurey, nafaqo leh, aan la diyaarin, degaanka lagu beeray kuwaas oo loogu talagalay in uu bani'aadamka cuno. Cuntooyinka u qalma looma warshadeyn karo ama looma diyaarin karo si dhaafsiisan xaaladooda dabiiciga ah marka laga reebo hannaannada nadiifinta iyo goosashada caadiga ah. Miraha ama khudaarta la qalajiyey, ama geedaha cuntada lagu darsado ee la qalajiyey looma tixgeliyo cuntooyinka u qalma. Dhirta khudaarta ama miraha ah ee dheriga ku baxa, geedaha dheriga ku baxa, ukumaha, hilibka, farmaajada, iyo cunto badeedka sidoo kale ma ahan cuntooyinka u qalma ujeedooyinka SFMNP.</p>
<p>Maxaa isbeddelaya oo maxay tahay sababta?</p>	<p>Ibiyeyaasha daabacay ka-dibna bixiyay jeegagga waraaqda ah ee loogu talagalay barnaamijyada nafaqada suuqa beeraleyda ee qaranka oo dhan waxay adeegyadooda joojiyeen dhammaadka 2022. Jeegagga la daabacey ma ahan ikhtiyaar loogu talagalay barnaamijkeenna.</p> <p>Kaarka cusub ee SFMNP waxaa taageera madashada dheefaha elektarooniga ah ee suuragelinaya helidda dhowr barnaamij iyo kumanaan ka-qaybgalayaal gobolka oo dhan ah.</p>
<p>Waa maxay koodhka QR?</p> 	<p>Koodhka QR waa koodh "jawaab degdeg ah" oo ay makiinad akhriin karto kana kooban xariiqo madow iyo cadaan isugu jira oo afar-geesood ah (ee ku yaalla sawirka kaarka ee hoose). Koodhkan gaarka ah wuxuu kaydiyaa macluumaad, sida macluumaadka dheefta SFMNP ee la iskaan-gareyn karo lana akhriin karo si loogu soo iibsado cuntooyinka u qalma.</p>

Halkeen ku isticmaali karaa dheefaha SFMNP?	Raadi calaamadda WIC/FMNP-ka Dadka Waaweyn ee "Dheefaha Ku Soo Dhawoow Halkan": Ku isticmaal dheefaha SFMNP beeraleyda la oggol yahay ee ku sugan suuqyada beeraleyda ka-qaybgaleysa, miisaska beerta, iyo miisaska waddooyinka dhinac-yaalla. Liiska suuqyada beeraleyda la oggol yahay iyo miisaska waddooyinka dhinac-yaalla ayaa halkan laga heli karaa: https://www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/senior-farmers-market-nutrition-program
Maxaa dhacaya haddii kaarkeyga uu lumo ama la xado?	Kaararka lumay ama la xaday waa la bedeli karaa. Fadlan wac isuduwaha hay'adda SFMNP ee degaankaaga (https://www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/senior-farmers-market-nutrition-program-contacts) AMA lambarka adeegga macmiisha ee ku qoran xagga dambe ee kaarkaaga (1-800-841-1410) haddii aad qabto su'aalo ku saabsan hannaankan.
Miyaan hubin karaa haraaga dheeftayda SFMNP?	Haa. Hubi haraaga kaarkaaga SFMNP adiga oo wacaya 1-844-359-3104 oo diyaarso kaarkaaga marka aad wacdo. Lambarkan telefoonka ayaa sidoo kale ku yaalla xagga dambe ee kaarkaaga dheefaha SFMNP.
Beddelkiisa ma dooran karaa in aan helo jeegag waraaq ah?	Maya. Jeegagga waraaqda ah looma bixin doonno barnaamijkan. Waxaad kaloo sameyn kartaa iibabka qaddaro aan ahayn kuwa \$4 ku korora, taas oo ah dheef cusub oo isbeddelkan leh.
Miyaan u baahanahay kombiyuutar mise telefoon casri ah?	Maya. Marka aad iibsato cuntooyinka u qalma, qofka beeraleyda ah ee aqbala dheefahaaga wuxuu haysan doonaa telefoon ama aalad awood u leh in ay ka shaqeyso dheefahaaga. Looma baahna in aad haysato telefoon casri ah ama kombiyuutar si aad u adeegsato kaarkaaga.
Ka waran haddii aad ku adeegato in ka badan haraaga kaarkeyga?	Haddii aad iskudaydo in aad sameyso iib ka badan haraaga dheefahaaga, qofka beeraleyda ah waxaa la ogeysiin doonaa in aysan ku jirin kaarka maaliyado ku filan iibsiga. Haraaga ku harsan ayaa la soo bandhigi doonaa, waxaanna laga yaabaa in aad iibsiga wax ka beddeshaan adiga iyo qofka beeraleyda ah, ama in aad lacagta bixiso adiga oo adeegsanaya hab kale oo la oggol yahay (kaash ama kaarka amaahda, tusaale ahaan) si aad u dhammeystirto wax-iibsigaaga.
Kaar kale ma heli karaa?	Kaararka lumay ama la xaday waa la bedeli karaa. Waxaad heli kartaa keliya hal dheefo sannad kasta.
Ka waran haddii PIN-keyga uusan shaqeyn?	PIN-kaaga caadiga ah waa iskujirka bisha iyo sannadka taariikhdaada dhalashada (BBSS). Haddii PIN-kaagu uusan shaqeyn, fadlan wac lambarka telefoonka adeegga macmiisha ee ku qoran xagga dambe ee kaarkaaga—1-800-841-1410. Ka-dib marka aad wacdo telefoon lambarka haraaga ama baaqiga la weyddiiyo ee ku yaalla xagga dambe ee kaarkaaga, waxaad ku beddeli kartaa lambarka PIN-ka ee BBSS ah lambar kale oo ka duwan adiga oo raacaya farriimaha. Fadlan xusuuso PIN-kaaga si aad ugu adeegsato iibabka mustaqbalka!